

## TALKING DRUGS PARENT WORKSHOP

MAY 2017

DIANELLA COMMUNITY COLLEGE

### TRANSLATION –

*Yahye Sheikh-Abdi  
Bi-cultural worker - Somalian*

Assalamu calaykum, caawa waxaan ka qayb qaataay kulan ay soo qabanqaabisay hayad la dhawo SDERA oo u taagan Iskool dharaags Ijukayshon iyo roodh awaarnes. Kulanku wuxuu ku saabsanaa in waalidiinta la siiyo information ama xog ku saabsan khatarta ay leetahay daroogada iyo khamrida iyo wixii hoosmiyaada oo dhan sida tubakada iyo kafiinka oo ah kofiga aynu cabno. Marka waxaa laga hadlay khatarta ama dhibka ay ku yeelankaraan daroogada iyo khamrida ilmo wali maskaxdiiso iyo jidhkiisu uuna korin. Xog fiican baa lala wadaagay walidiintii cawa ka soo qayb gashay kulankan. Waxaa muhiim ah in walidiinta Somaaliyed ay ka war hayaan informayshinkan oo kale si ay u caawiyaan ciyaalkooda ugana digaan khatarta ay leedahay daroogada iyo khamridu. Waa arin muhiim ah oo loo baahan yahay in ay iskoolata, dowladu iyo walidiintuba ay iska la shaqeeyaan si looga hortago khatartan. Iskooladu iyo dowladu howshan way ku howl jirta marka haduu walidkuna dhankiisa ka howlgalo wax badan baa laga qabankaraa ka hortaga daroogada iyo khamrida. Wuxaan ka codsanayaa in waalid kasta oo Somaali ah uu ka war hayo arimahan oo kale hadii aad u baahatid xog dheeri ah meelkasta baad ka helikarta ama la soo xidhiidh SDERA. Muhiimadu waa in aad ilmahaaga aad kala hadashid khatarta arinkan. In aad la sugtid inta uu ilmuu ka waynaanayo ma aha ee xitaa ilmaha yar waad kala hadlikaraa. Waa in waalidku la yeesho xidhiidh ilmihiiisa si uu kugu sheegto wax walba oo ku soo kordhaa nolashiisa. Waad mahadsantihiin.